Somali TB Audio Recording Script - Somali

Author(s): Content: Julie Wallace, RN, MSN; Translation: Mohammed Jama

QORAAL:

Listen to the Somali TB Audio Recording

Goobta ayaa furmaysa, codbaahiyaha wuxuu ku bilaabmayaa cod gaaban oo xiiso leh, koox afar ah oo fadhida guri soomaaliyeed kana hadlaya xafladdii Waqlal, ayaa waxaa goobta imanaya Warsame wuxuuna salaamaya kooxdii meesha wada fadhiday oo sheekeysaneysay.

Qof walbana wuxuu u salaamay Warsame si dhaqan iyo asluubi ku jirto, iyadoo uu sii fariisanyana ayaa su!aal la weydiiyey.

Cumar: Isaragti wanaagsan Warsame, ma waxaad ka timid guriga, sidaad ogtahayba waan isu soo raaci jirnay halkane?

Warsame: Mahadsanid taasi waa wax lagu farxo, maya, laakiin kama imaan guriga ee waxaan ka imid dhakhtarkeyga.

Cumar: Waxaan kuu rajeynayaa caafimaad qab.

Warsame: Haa waan caafimaad qabaa, Mahadsanid, si walba ha ahaatee anigu ma faraxsani, dhakhtarkeygu wuxuu u maleynayaa inaan buko wuxuu maanta ii sheegay inaan jirannahay.

Waxaan u tagay oo aan arkay labo casho ka hor iyadoo la iga doonayo inaan maro waraaqihii sharciga (Green Card) ka buuxintooda.wuxuuna rabay inaan u soo laabto maanta. Maantana wuxuu igu yiri oo uu rabay inuu ogaado inaan qaato daawada iyo in kale, aniguna ma dareemayo wax Xanuun ah. Xaqiiqdii anigu waan caafimaad qabaa, umana maleynayo inaan mar kale arkayo ama dhakhtar kale aan u tegaayo, sababtuna waa uma maleynaayo inaan qof kale aaminaayo.

Cabdi: Haa xaqiiqdii caafimaadkaagu wuu fiican yahay (Mahadaas ilaah baa leh) taasna waxaan uga mahad celinaynaa ilaahay.

Laakiin maxay tahay sababta uu kuu leeyahay waad jirran tahay adigoo caafimaad qaba, iyo haddana maxay tahay sababta uu u rabo inaad qaadato daawo.muxuuse kaloo yiri oo ay daawadani ka walax tahay.

Warsame: Wuxuu igu yiri waxaad qabtaa tiibisho ama (Qaaxo) aniguna waan ogahay inaanan qabin, waana xaqiiq oo si aan u qabi karo Tiibisho maba jiri karto.micnaheyguna waa bal I soo fiiri ma qufacaayo,hadda ka horna ma qufacinkan ka hor ma ahane.

Laakiin wuxuu ii sheegay inaan u baahanahay daawada tiibishada (waxba ma kala oga ama waxba ma kala yaqaan.)

Mukhtar: Ma lagaa qaaday raajadii tiibishada ama qaaxada?

Warsame: Haa, wuxuu iga qaaday raajo cusub manta, iyadaoo xataa aan u sheegay in raajo hadda ka hor la iiga soo qaaday Nayroobi,intii aanan imaan ka hor.

Wuxuuna ii sheegay in raajooyinka ay caadi yihiin ayna wax cudur ah sheegeynin, laakiin weli wuxuu Igu leeyahay waxaad qabtaa Tiibisho ama Qaaxo. Labo mar oo horena waan caddeeyey inaan qabin wax qaaxo ama Tiibisho ah.sidoo kalena dhakhtarku wuxuu ii sheegay inaan u baahanahay daawada inaan qaato muddo sagaal bilood ah bal inay wax ka tarto Tiibishada ama Qaaxada. Marka sagaal bilood waa wax waalli ah, anigu ma buko ma doonayo mana aqbalayo inaan qaato wax daawo ah.

Cumar: Ma ogtahay anigana sidaasoo kale ayaa igu dhacday, dhakhtarkeyguna wuxuu isku dayey inuu ii sheego taasoo kale, raajooyinkeygana waxba laguma soo saarin ama lagama helin. Waxay kaloo iga baareen gacanta, ayna ii sheegeen inay tahay baaritaan qaaxo ama Tiibisho, gacanteyda tijaabadii ay ku sameeyeen waxay yeelatay barobaro guduudan oo iga soo baxay micnaheedu waxay tahay inaan qabo Tiibisho. Iyadoo xataa raajooyinkeygiina aan waxba laga helin sidaadoo kale.

Inkastoo xataa aynan macno ii sameyneyn aniga, laakiin waan sameeyey waxyaabihii uu dhakhtarkeygu iga codsaday, markaa waxaan bilaabay inaan qaato daawadeydii, laakiin waaan joojiyey labo bilood ka dib.

Waxaan is tusay muddadaas inay tahay muddo igu filan waxaan ula jeedaa anigu ma jirranneyn markii aan bilaabay mana jiran markii aan joojiyey.kaliya waxaan ogaaday inaanan qabin wax Tiibisho ah ama Qaaxo. Xataa qof reerkayaga ah oo qaaxo qaba ama qabi jiray lama sheegin. Anigu waxaan ahay nin Muslin ah oo wanaagsan reerkayagana sidoo kale, bal taasna ogow.

Waxaan kaloo is tusay in dhakhtarkeygu xataa uu yahay nin fiican oo aad iigu naxariista, waa maxayse sababta aan weli u qaadanayo dawadaas.

Cabdi: AH! Waxaan u maleynayaa inaan fahmay dhakhaatiirta.

Warsame: Waad saxsantahay, adiga hadda ma jiranid, qufacna kuma hayo, waana ku saxan tahay raajaduna waa caadi wayna sheegeysaa inaadan u jiranneyn wax qaaxo ama Tiibisho ah. Taasna waa wax loo riyaaqo in la ogaadana ay muhiim tahay, laakiin bal aan kuu shraxo sababta uu kuu yiri dhakhtarku dawo qaado.

Raajooyinka xabadka waxay ku tusayaan isku dayidda ama sida loo ogaado dadka jirran, sidaa daraadeed ayey u noqotay raajo aan caadi ahayn. Sababtuna waad caafimaad qabtaa .

Laakiin gacanta baariddeeda waxaa lagu magacaabaa (PPD) waana tusidda iyo heildda dadka caafimaadka qaba waqtigan la joogo, laakiin yaa helaya fursadda uu qofku ugu jiran karo Tiibisho ama Qaaxo. Waqtiyo dabadood ama noloshooda inta ka hartay.

Ruqiyo: Laakiin aniga weli ma fahmin, sababta uu dhakhtarku u yiri waxaad u baahan tahay daawada Tiibishada ama Qaaxada haddii aadan qabin ama aadan u jiranneyn wax tiibisho ah?

Mukhtar: Ma ogtahay, wixii Cabdi uu yiri waa sax. Waana sida aan u fahmay aniga xataa. Aniga lafteyda waxaa la iga baaray (PPD) taasoo keentay in gacanteyda ay yeelato barobaro cas cas, marka aniga xataa waan yeeshay markii la mariyey baaridda raajada, sidaadoo kale Xasanow iyo adiga Cumar ah .iyo waxaa kaloo la ii sheegay inaan qaato daawada Tiibishada muddo sagaal bilood ah waana qaatay.

Sababtuna waa habkii ama jidkii Cabdi iigu sharxay waana sax waana taas daawadii aan qaatay.iyo daawada uu dhakhtarkaagu uu rabo inaad qaadatid waa midda dadka aan u jiranneyn tiibishada, daawadani waa midda dadka caafimaadka qaba aana lagu arkin wax qufac ah ama aynan hayn wax Qufac ah ama wax Qandho ah, iyo waliba miisaankiisuna uusan is dhimin.waxay kaa daafaceysaa inay kugu dhacdo ama aad qaadid Tiibsiho ama Qaaxo waqti dambe ama soo socda.

Cabdi: Markii lagaa baaro (PPD) ayna ku caddaato, taas micnaheeda waa in jeermiskii Tiibishada ama Qaaxada uu korgaaga ku jiro. Iyadoo xataa lagaa helay ama ay kugu caddahay baariddii lagaa baaray (PPD) da. Haddii xataa aysan raajadu caddeyn amase ay qeexin, taas micnaheeda waa weli jirkaaga jeermis ayaa ku jira laakiin hadda kuma dhibayaan. Gof walba oo uu jirkiisu ku jiro jeermiska waxaa laga yaabaa mustaqbalka inuu u jirrado. Xataa haddii uu hadda caafimaadkiisu aad u wanaagsan yahay.

Waana daawda kaliya ee uu dhakhtarkaagu kuu qorayo, taas kaliya ayaa disha jeermiska marka jirkaagana kuma hareyso xataa haddii nawaaxigaas laga helo, kumana jirraneysid.

Ruqiya: Laakiin, qof ka mid ah reerkayaga weli lagama helin wax Tiibisho ah ama qaaxo ah sida Aabahay weligiis lagama helin, Hooyadayna maya ama wax awoowayaashay tafiirtooda ah, marka sidee jirkeyga gudihiisa uu u yeelan karaa jeermiska Tiibishada.

Waa maxayse aniga iyo ilmahayga oo aan ugu baahannahay inaanu ka welwelno inay nagu dhacdo mustaqbalka Tiibisho ama Qaaxo?

Dhakhtarku wuxuu ku yiri walaalkay iyo walaashay baariddii (PPD) da ee laga qaaday inaan waxba lagu arkin , laakiin aniga waa la iga helay , waxayna u muuqataa haddii ay iyagu qaadan wax daawo ah. Anigu qaadan mayo waxaana isla deggenneyn oo aan wada nooleyn muddo dheer qof naga mid ahna ma jirran.

Cabdi: Waad ku saxsan tahay (Ruqiya) inaad ogtahay taas haddii reerka qof ka mid ah uu qabo ama uu u jirran yahay Tiibisho ama Qaaxo, isaga ama iayada ayaa qaadsiinaya dadka jooga nawaaxigaas.

Kooxda oo dhan: HAA, Taasi waa dhab.

Cabdi: Laakiin ma ogtahay inaad Tiibishada ka qaadi kartid dad ka baxsan reerkaaga ama dibadda ka ah, haddii aad ag fariisato qof jiran iyadoo Bas laga buuxo ama waqti hore oo la soo dhaafay, waxaa laga yaabaa inaad ka qaaddo jeermis haddii isagu ama iyadu ay ku qufacaan meel kuu dhow.waana ognahay dadkaasi inay ku jirranaayeen xeryihii qaxootiga ee Kenya, xataa haddii aad ka qaaddo jeermiska tiibishada qof aad isku xero tihiin ama qof kale oo aad Bas isla raacdeen waxaa laga yaabaa inay jirkaaga gasho, sida uu dhakhtarku kugu yiri.hadda uma jirraneysid, laakiin mustaqbalka waxaa laga yaabaa inay kugu soo baxdo.

Ruqiya: Laakiin, annagoo dhan waanu ognahay in Tiibishada ama Qaaxadu ay tahay wax ilaahay abuuray, way kugu dhici kartaa ama waa lagugu imtixaami karaa, gaar ahaan dadka xunxun ama wax xada ama sameeya waxyaabaha aadka u foosha xun, waana ognahay inay ku dhaceyso tiibisho am Qaaxo .

Cabdi: Haa. Dabcan waxaad sheegeyso waa run, annagoo dhan waa aaminsanahay ina xanuun walba uu jiro gaar ahaan tiibishada ama Qaaxada waan imtixaankii ugu dambeeyey oo uu ilaahay kugu tusaayo cadaab adduunyada korkeeda ah. Laakiin waa muhiim inaad fahamto jeermiska Tiibishada iyo sida la isugu gudbiyo, markii qof uu qabo tiibisho ama uu qufacayo sidii aan markii horeba aan iri.

Cumar: Waan arkaa in arrimaha aad noo sharxeyso ay macno inoo sameynayaan, laakiin weli waxaan ogahay in qof walba oo ka mid ah reerkeenna laga tallaalay (BCG) oo tallaal ah iyo (BCG) oo ah ka hortegidda tiibishada, haddii xataa aan joogno meel ay wada joogaan dad qaba tiibisho jirkeyga wuu iska difaacayaa.

Cabdi: Waad ku saxsantahay taas, Cumarow.

Tallaalka (BCG) da ee aad adiga iyo reerkiina iyo Soomaalida inteeda badanba laga tallaalay waxay kaa caawineysaa ka hortegidda inay Tiibisho ama Qaaxo kugu dhacdo.

(BCG) du waa tallaal aad iyo aad muhiim u ah, sababtuna waa aad ayey yareyneysaa ama u saacideysaa inay u baahdo qeybaha khatarta ah ee Tiibishada ilmaha yaryar ku dhacda.

Laakiin (BCG) da kuma haboona kuma shaqeyso qeyb walba oo tiibisho ah iyo walibana ma sameyneyso ka hortegid weligeed ah oo dhinaca tiibishada ah.

Dhamaanteena waan ognahay in Soomaaliya iyo Kenya ay dad badan u jiran yihiin Tiibisho ama Qaaxo xataa dadkii laga tallaalay (BCG) da.

Warsame: Laakiin muxuu ina-adeerkay iigu sheegi waayey barobaraha cas cas ee gacanteyda ka soo baxay inaan ka qaaday Tiibishada la iga baaray oo la igana tallaalay mar hore.

Wuxuu igu yiri tallaalka ayaa keenay inay kugu caddahay ee ma aha aniga inaan qabo Tiibisho ama Qaaxo.

Mukhtar: Dhakhtarkeygu wuxuu ii sheegay in mararka qaarkood ay dhab tahay in tallaalku uu keeno ama uu kugu caddeeyo haddii laga baaro gacantaada, laakiin waa kaliya marka qofka dhawaan la tallaalo. Dhamaanteenna waan ognahay in nalaga wada tallaalay (BCG) markii aan caruurta aan ahayn.

Sidoo kale wuxuu I xusuusiyay xataa dadka laga tallaalay (BCG) da inay qabi karaan Tiibisho ama Qaaxo. Xaqiiqdiina tiibishadu waa waxa ugu badan oo qeybo ka mid ah adduunka ay heleen ama laga tallaalay (BCG) da. Iyo sida dadka annaga oo kale ah kana kala yimid qeybaha kala duwan ee adduunka uguna baahan daawadan si aad ah .taas ayaa dhakhtarkaagu kugu baraarujinayaa adiga inaad ka warbixiso aadna ka caawinto ka hortegidda Tiibishada ama Qaaxada.

Cumar: Mar kale, waxaan u maleynayaa in waxa aad noo sheegeyso ay macno sameynayaan, laakiin ma inaan qaataa dhamaan sagaalka bilood daawada?

Ma ahayn labo bilood anigu mar hore ayaan qaatay dawo aan ugu hortago ama i daafacda

Cabdi: Maya, nasiibdarro jeermiska Tiibishada way dhaldhashaan, waana run taas qaar ka mid ahna jeermiska ku jira jirkaaga hubaashii waxaa dilay dawooyinkii, laakiin waxay qaadaneysaa sagaal bilood ku dhan aadna ku hubineyso jeermiska oo idil.xataa haddii kuwa ugu xoogga badan ay dhintaan waxay kaa daafaceysaa mustaqbalka.

Sagaal bilood la!aanteedna weli waxaa dhici kara isbedel ah inaad mar uun u jirrato Tiibisho ama Qaaxo waqtiyo ka mid ah mustaqbalka innagu soo fool leh.

Cumar: Waxaan u maleynayaa inaan mar kale la hadli doono dhakhtarkeyga aana kala hadli doono qaadashada daawada iyo dhamaan sida aan u qaadanaayo

Cabdi: Haa, taasi waa waxa ugu wanaagsan ee la sameeyo waana arrin muhiim ah kaana daafaceysa ka hortegidda Tiibishada ama Qaaxada.

Ruqiya: Mukhtaar, waad qaadatay dawadii oo dhan sow sax ma aha?

Marka taas micnaheedu waa hadda baaridda (PPD) da waxba kuma cadda, kugumana dhaceyso Tiibisho sow sidaa ma aha?

Mukhtar: Waad saxsan tahay Ruqiya, daawadu waxay kaa daafaceysaa inaad qaaddo ama ay kugu dhacdo mustaqbalka wax Tiibisho ah ama Qaaxo ah.

Jeermiska tiibishada ee ku jiray jirkeygana waa ay wada dhinteen laakiin baaridda (PPD) da mar walba waxay sheegeysaa inaan qabo Tiibisho ama Qaaxo.sidee u maleyneysay markii aan dhameystay daawadeyda, waxaan is iri armuu dhakhtarku kugu yiraayhdaa halgaa baaro (PPD) kale waxayna noqoneysaa waa barkumataal, waxaana u maleynayaa waa sidan habka ay u baaraan ama u falanqeeyaan in dawadau shaqeyso iyo in kale, waanse ogahay hadda taas ma soconeyso. Marwalba oo (PPD) da la iga baaro waxay noqotaa inaan qabo Tiibisho, marka sidaa

daraaddeed qof walba oo qaba ama laga helo calaamadaha (PPD) da uma baahna in mar kale la baaro.

Ruqiya: Lakiin maxaad mar walba aad u noqotaa ama ay kuugu caddaataa (PPD) da? aniguma garanayo kolley, bal dawooyin qaado.

Abdi: Waxaan isku dayayaa bal inaan kuu sharxo wixii Mukhtaar yiri, waana sax.

Baariddu waa jidka kaliya ee aad ku ogaan karto in jirkaaga uu la kulmay ama la xiriiray jeermiska keena Tiibishada. (PPD) dana markay kugu caddaato ama lagugu sheego taaasi micnaheeda waa jirkaaga wuu leeyahay ama wuu ku jiraa jeermiska Tiibishada, kaliya waxaa ogaan kara dadka uu ku soo dhacay ama ay soo heshay Tiibisho, ayaa garan kara jeermiskaan.

Dadka aan weligood laga helin jirkooda marka laga baaro (PPD) da waa laga helayaa, haddii aan qofka laga helin waxaa laga yaabaa inay mustaqbalka ka baaraan baaritaan cusub oo (PPD) ah.

Middaana waxaa lagu hubiyaa illaa iyo waqti, marka laga soo bilaabo (PPD) di ugu dambeeysay ee lagaa baaro iyo Qofkani lama uusan xiriirin qof qaba tiibisho, markase qof (PPD)se ay noqoto waxaan ku caddeyn ,umana baahan mar kale in la baaro, xataa haddii ay qaadanayaan wax dawo ah oo ka hortageysa inay ku dhacdo mustaqbalka tiibisho.

Daawada kama dhigeyso baaridda lagaa baaray (PPD) da inaan lagaa helin, sidaan xusuusanahay baaridda waa dariiqa kaliya ee lagu soo saaro in jirkaagu leeyahay jeermiska tiibishada, mana aha haddii uu lahaa jirkaagu jeermiska tiibishada.xataa haddii aad ka dabargoysid jirkaaga dhamaan noocyada jeermiska tiibishada adigoo qaatay dawooyin, haddana weli jirkaagu weli wuxuu awood u leeyahay inuu garto in lagu soo socdo iyo in kale, sababtuna waa jirkaaga taariikh buu u leeyahay inuu xusuusto waxyaabihii soo maray.

Mukhtar: Haa! Taasi waa wax la I soo baray anmba

Cabdi: Warsame maxaad u maleynaysaa inaad sameyneyso imminka.

Warsame: Waad ku mahadsan tahay caawinaadda aad igu caawintay inaan fahmo, hadda waan kala garanayaa farqiga u dhaxeeya raajada xabadka baariddeeda iyo (PPD) da baariddeeda, raajada xabadka waxaa la iigu sheegay inaanan u jirraneyn Tiibisho iyo (PPD) baaridda maqaarka jirka oo la iigu sheegay inaanan qabin wax tiibisho ah kaliya waxaan qabaa jeermiska tiibishada ee jirka gudahiisa.

Waxaana laga yaabaa inaan u jirado mar dambe. Marka waxay ila tahay dhakhtarkeygu inuu wax kala garanyo, markii uu igu lahaa qaado dawooyinkaas, waxaa laga yaabay inuu fiirinayey xaaladeyda caafimaad guud ahaan.waana aaminay, mana rabo inaan jirado mustaqbalka, mar walbana waxaan aaminsanahay ilaahay caafimaadna uu I siiyey, laakiin waxaan u maleynayaa in ilaahay uu gacanta dhakhaatiirta noogu daray daawo.

Cabdi: Warsame waad ku saxsan tahay aaminaadda aad ilaahay aaminsantahay kuguna caawinay inaad caafimaad qabto.

Ilaahayna waa kula jiraa waana kuu joogaa, sababtuna waa waxaad tahay qof Muslin ah oo wanaagsan, meeshan aynu joogno oo Ameerika ahna waxaa taal daawo fiican oo haddii ilaahay dawo kaaga dhigo ama kuugu daro wax ku tareysa. Waxayna ku tuseysaa qaddarin aad u heyso ilaahaygii ku abuurtay marka aad qaadaneyso dawo aadna is leedahay waad ku caafimaadeysaa sababtuna waa ilaahay baa og ama waaba ilaahay dartii ama ogaanshahiisa dawadii kugu haboon ama tii aad ku caafimaadeyso.

Ruqiya: Waad saxan tahay Cabdi, hadda waan fahmay waana sax, waana wax kaa caawinaya inaad qaadato daawo ku caafisa.

Waxaana uga mahadnaqeynaa ilaaha weyn ee caafimaadka na siiyey.

Kooxdii oo Dhan: HAA- Waxaanu u wada mahadnaqeynaa ilaaha weyn ee caafimaadka na wada siiyey.